

TALAABADAHA ARJIGA MAALIYADDA KAALMADA KIRADA (DAGGANEYAASHA)

TALAABADA 1AAD

Arjiilaha wuxuu internetka ka buuxiyaa arjiga RRF, kana mid ah:

- Koobi saxiixan oo ku saabsan kirada ama heshiiska dagganaha
- Warqadaha sawirka ee loogu talagalay madaxa reerka
- Macluumaadka lagala xariiro milkiilaha hantida/maamulaha hantida
- Warqadaha manaafacaadka shaqo la'aanta (haddii lagu dabaqi karo)

Koobiga heshiisyada dagganaha waxaa laga heli karaa [bogga internetka RRF](#).

Tilmaamaha ku saabsan sida loo adeegsado telefoonka, loona soo geliyo warqadaha, riix [halkaan](#).

Arjiga, dagganeyaasha waxay codsan karaan in loo soo diro fariin qoran si loola socodsiiyo wararkii ugu dambeyay.

TALAABADA 2AAD

Waa la baaraa arjiga si loo ogaado xaq u yeelashada. U qalmi la'aanta waxaa ka mid ah:

- Arjiilaha ma aha kireyste daggan Magaalada Boston
- Arjiilaha waa arday waqti buuxa
- Arjiilaha wuxuu qaataa fojarka ku saleysan mashruuca ama fojarka lala dhaqaaqo.
- Arjiilaha wuxuu ka sareyaa 50% AMI

Dagganeyaasha waxay racfaanka ku qaadan karaan email: RRF@boston.gov

TALAABADA 3AAD

Arjiyada waxaa loo fiirin doonaa haddii ay dhamaystiran yahiin Arjiilaha waxaa la ogeysiin doonaa warqadaha ka maqan lifaaqyada.

TALAABADA 4AAD

Arjiyada la dhamaystiray waxaa loo diri doonaa wakaaladaha iskaashiga. Wakaaladaha iskaashiga waxay codsan doonaan warqado dheeraad ah oo laga soo qaado maamulaha hantida/milkiilaha hantida. Kaddibna, wakaaladda iskaashiga waxay bixin doontaa maaliyadda.

TALAABADA 5AAD

Bixinta kaalmada kirada waxaa toos loo siin doonaa maamulaha hantida/milkiilaha hantida. Dagganeyaasha waxay heli doonaan xaqiijinta kaalmada iyo koobi ku saabsan heshiiska milkiilaha oo saxiixan.